

WARSIDE
ERGADA ICRC EE SOOMAALIYA
DAABACAAD NO.5 FEBRAAYO 2016

# GARGAAR

## HAWLAHA CAAFIMAADKA EE SOOMALIYA

Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas waxay raad raaci kartaa doorkeeda dhanka caafimaadka oo ah asalka hay'adda. Aragtida gumaadka ba'an ee dagaalka ayaa keenay rabitaanka in la sameeyo ururka. 150 sano ayaa laga soo wareegay, muddadaasi ayaa keentay in shaqadeena caafimaadka ay ballaarato laga soo bilaabo daryeel toos ah oo loo fidinaayo kuwa ku dhaawacmay dagaalka, ka dib waxaa lagu daray qalliinka dagaalka, taageero la siiyo daryeelka caafimaadka asaasiga ah iyo dalal badan oo caalamka ayaa laga hirgeliyay xarumo takhasusi ah ee dhanka lafaha iyo addimo macmalah.

Xaqiijinta daryeel caafimaad oo tayo leh had iyo jeer waa caqabad ka jirta gudaha Soomaliya, haddana arrintaan waxaa sii xumeeyey xasillooni la'aanta, dagaallada hubeysan oo dabadheeraaday iyo cimmilo xun oo soo noqnoqato. Baahida loo qabo xarumo caafimaad oo si fudud loo gaari karo, shaqaale takhasusi ah iyo qorsheyn iyo khibrad dhanka maamulka ayaa si weyn loo dareemayaa iyadoo jirto dhibaatooyin guud oo ay bulshada la kulmayso. Tani waa hawl ka weyn in uu qabto jilaa keligiis laakinse waxaan ka faa'idnaa wadashaqeynta xooggan oo aan la leenahay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si aan u fulino doorkeena.

Dhammaan muhiimadda hawsheena waa fal shakhsiyeed ee bani'aadamnimo ah; tani waxaa astaan u ah soo muuqashadii daryeelka caafimaadka. Muhiimada ficilkan uu u leeyahay colaada hubeysan waxaa lagu muujiyey Sharciga Caalamiga ah ee Aadminimada (Sharciyada Colaadaha hubeysan) kaas oo ku adkeysta in shakhsiyaadka ku dhaawacma dhammaan dhinacyada colaadaha ay shuruud la'aan xaq u leeyihiin daryeel caafimaadka iyo ilaalinta xarumaha iyo shaqaalaha caafimaadka. Rabshadaha ka dhanka ah bukaanada iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka weli waxay ku sugan yihiin khatar waana arrin bani'aadamnimada oo la iska indhatiray gudaha Soomaaliya iyo meelo ka baxsan.

Bogagaan waxay sharaxayaan howlaheena, waxaana ka mid ah taageer maaddi iyo tababar oo la siinayo isbitaalada, xarumaha caafimaadka aasaasiga ah ee Bisha Cas iyo sahay agab caafimaad oo loogu talagalay in lagu daweeyo kuwa ku dhawacmeen dagaalada hubaysan. Waxaa laga yaabaa midda ugu welwelka badan ee shaqadeena inay tahay aqoonsashada inta harsan ee ay tahay in la qabto. Tusaalooyinka la bixiyay waa qeyb yar oo ka mid ah jawaabta loo baahan yahay.

Inkastoo howsha ugu weyn ay u muuqan karto mid aad u ballaaran, tusaalooyinka shakhsideed sida tababarte dadaal badan, hooyo xannaanoleh iyo agaasime Isbitaal oo howshiisa ka adag waxay balanqaad u yihiin waqtiyo an aad u adkayn ee soo socda.



**Jordi Raich Curcó**
**Madaxa Ergada ICRCda ee Soomaaliya**

ICRC

# SOOMAALIYA: TOBANEEYO SANO OO ADEEG FIDINAAYA ISBITAALKA KEYSANEY EE MUQDISHO

Dr. Axmed Maxamed oo loo yaqaano Dr. Taajir ayaa sannadkii 1992dii shaqo ka bilaabay Isbitaalka Keysaney, sannad ka dib dhiciddii maamulkii Siyaad Barre oo soo dedejiyey in xaalad colaad sokeye ay ka dhacdo Soomaaliya. Isbitaalka Muqdisho waxaa maamula Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed wuxuuna kaalmeeyey tobannaan kumanaan bukaan ku dhaawacmay colaada hubeysan. Dr. Taajir oo hadda 56 jir ah oona ka shaqeeyay isbitaalka muddo 24 sanno ayaa noqday madaxa qalliinka waxaana uu noqday wajiga isbitaalka. Dagaalka joogtada noqday bartamihii 90yadii ayaa yaraaday laakiin waxaa weli colaad jiitantay ay ka jiraan meelo ka mid ah Soomaaliya, Muqdisho na way ka mid tahay, halkaaso dhibanayaal badan oo ku waxyeeloobay lagu daweeyo Isbitaalka Keysaney.

Dr Ahmed Tajir ayaa fursad noo siiyey inuu noogu sheekeeyo nafsadiisa

**S: Sidee baad ku noqotay dhakhtar qalliin?**

**J:** Anigoo wiil da'yar ah ayaan jeclaa in aan noqdo kan ugu weyn. Anigu waxaan ku dhashay qoys reer miyi ah, waalidiinteyda wax weyn ayey ka qabteen waxbarashadeyda. Waqti mudan in la xusuusto ee carruurnimadeydii ayaa ah booqasho aan ugu tagay isbitaalka qaraabo ku soo dhaawacmay xabad. Inkastoo dhakhtarka sameeyey dadaal badan qofkii dhaawaca wuu dhintay. Sheekadaan murugada leh ayaa igu dhiirigelisay in aan barto cilmiga daaweynta. Waxaan go'aansaday in aan noqdo dhakhtar fiican oo dhanka qalliinka nololna aan badbaadsho. Soomaaliya waxay u baahatay dhakhaatiir aqoon u leh dadka iyo dhaqanka.

**S: Labaatan sano oo shaqo waa muddo dheer, maxaa keenay adkeysashadaada?**

**J:** Weeraro iyo qarraxo isdabajoog ah ee Soomaaliya ka dhaceen waxay keeneen kumanaan dad oo dhawacan oo daaweyn degdeg ah u baahan. Dakhatiir ku filan baahidaasi ma jirin, sidaas darteeda waxaan go'aansaday in aan haro si aan u badbaadiyo dadkii u baahnaa. Wajiyada dadka bukan ayaa adkeysashadeeydu kordhiyay. Waa dadkaani kuwa i siiya xoogga iyo guubaabada maadaama aan rabo in aan xaaladdooda wax ka bedelo.

**S: Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed muddo 23 sano ayuu maamulayey isbitaalka. Sidee baad u aragtaa?**

**J:** Sannooyinkaan badan oo isbitaalka aan ka shaqeynayey waxaan in badan dareemaya in aan ka mid ahay shaqaalaha Ururka Bisha



Dr. Taajir (bidix) xilli hawl qalliin ah ka socotay Isbitaalka Keysaney

Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) marka wax kaleba laga soo tago. Ururka ujeeddadiisu waa in uu yareeyo dhibka haysta dadka iyagoo la siinayo daryeel caafimaad oo tayo leh oo lacag la'aan ah. Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed wuxuu suurtageliyey in isbitaalka si madaxbannaan u shaqeeyo una adeegaya dhammaan bulshooyinka iyadoon la eegin qabiilkooda, diintooda ama siyaasadda ay raacsan yihiin.

**S: Sidee baad isu dheelitirtaa nolosha qoyska iyo shaqadaada mashquulka badan?**

**J:** Qoyskeygu way igu caawiyaan shaqada aan qabto. Gadaal ayey iga taaganyihiin 25ka sano ee la soo dhaafay, guul kasta la ii sababeeyo waxay ka timid taageerada dhankooda. Marka isbitaalka aan joogo waxaan ahay dhakhtar, marka guriga aan joogana waxaan ahay aabe, adeer iyo qof xaasle ah.

**S: Maxaa sharaf kuu ah inta badan sannooyinkan?**

**J:** Waxaa ii soo maray qibrado xusuus badan oo aan la qaatay bukaanka laakiin mid iigu xusuusta badan waxay ahayd badbaadinta haween ee uur lahayd oo dhaawac xabadeed ka soo gaaray meel ku dhow caloosha. Haweenada uur sagaal bilood ayay lahayd dhaawaca xabadduna aad buu u xumaa kaasoo dilaaciyay ilmo-galeenka. Nasiib darro laguma guuleysan in cunigga la badbaadiyo. Niyadda ayaan ka xumaaday inaan isha saaro xaaladdaan murugta leh waalid ahaan. Nasiib wanaag, hooyadii way badbaadday waxayna u heshay fursad labaad ee nolosheeda. Maanta waxay ka shaqeysaa dukaan ku yaala magaalada mar walba aan arkana waa ku farxaa siday ugu mashquulsan tahay hawl maalmeedkeedii.

**S: Ammaanka waa arrin wayn ah, sidee baad u fulisay shaqadaada iyadoo jirto cabsi weeraro joogto ah?**

**J:** Dhif ayaan aragnaa dhacdooyin ka dhaca isbitaalka maadaama aan nahay dhexdhexaad iyo kuwo dhinacna aan raacsaneyn. Waxaan halkaan u joognaa in aan gargaar daawo siinno kuwa u baahan iyadoon la eegin wixii ay xiriir la leeyihiin. Xaaladdaan ayaa noo suurtagelisay in aan sii shaqeyno iyadoo jirto marxalad dhib leh. Isbitaalka Keysaney illaa iyo hadda wuu shaqeeyaa, qofkastana wuu ogyahay in Isbitaalka bulshada soomaaliyeed ayaa ley waxaana lagu tala galay dadkii u baahan daryeel cafimadeed.



Dhibbane qaba dhaawaca hubka oo qalliin looga sameynaayo Isbitaaka Keysaney

**S: Maxay yihiin dhibaatooyinkaaga ugu waaweyn?**

**J:** Dhibaatooyinka aan la kulanno badanaa waxay la xiriiraan awoodda waxqabadka deg degga ah. Waxaa nagu yar dhakhaatiir qalliin oo aqoon fiican leh iyo keydka dhiigga aan haysano aad buu u yar yahay. Waxaan aragnaa bukaano badan oo u baahan labadaba tanina waa dhibka jira. Hase yeeshee yaraanta, waxaan isku daynaa intii aan awoodno in aan uga jawaabno xaaladaha deg degga ah nololna aan badbaadino.



## Isbitaalka Keysaney xaqiiqooyinka iyo tirooyinka

Tan iyo sannadkii 1992, isbitaalka waxaa la keenay 180,000 bukaan, wuxuuna gargaar siiyey in ka badan 84,000 bukaan oo qaba dhaawac rasaas.

Qolka qalliinka cusub oo ay dhistay ICRCda sannadkii 2014 wuxuu hagaajiyey awooda isbitaalka si uu uga jawaabo xaaladaha deg degga ah.

Xogta Isbitaalka Keysaney Jannaayo ilaa Disember 2015;

- 2,837 wadarta guud isbitaalka la keenay
- 747 bukaan qaba dhaawac ayaa la keenay isbitaalka

# DARYEEL CAAFIMAAD XILLIYADA COLAADAHA

Dhaawacyada hubka waa kuwa ugu qasan ee la daweeyo ama qalliin lagu sameeyo. Nasiibdarro, Soomaaliya waxay aragtay in ka badan qeybteeda dhibanayaal oo waxyeelo ka soo gaartay hubka tan iyo markii ay qarxeen dagaalada sokeeya dhamaadkii 1991di. Tobonaan kun oo ka socda qaybaha kala duwan ee dagaalada, iyo rayidkaba, ayaa jirka dhaawac ka gaaray marka dalka dagaal galay labaatankii sanno ee ugu dambeeyey.

Xilliyadii ugu xun ee dagaalada ba'an, rayidka iyo kooxaha hubaysan way ku adag tahay in ay helaan daryeel caafimaad. ICRCda waxay isku daydaa inay saacido iyadoo bixinaysa qalab caafimaad sidaa darteedna dhaawaca iyo dadka buka way heli karaan daryeel. Sahayda caafimaad ay ICRC ka bixiso Soomaaliya waxaa ka mid ah xirmo dhaawaca hubka, xirmo dhayid iyo xirmo gargaarka deg degga ah, kuwaasoo qaar ka mid ah lagu sii keydiyo meelo kala duwan si jawaab deg degga ah loo bixiyo. Hoos waxaa ku qeexan xirmooyinkaan iyo isticmaalka loogu talagalay.

"Kuwa dhaawaca iyo kuwa buka waa in la soo qaadaa lana daryeelaa. Urur aan eexan oo gargaarka ka shaqeeya sida Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas adeeg wuu siin karaa kooxaha ku lugta leh dagaalada."

*Gabal laga soo qaaday Axdiga 1 aad ee Jineefa, Cutubka 1, Qodobka 3, qeybta 2*





Gaari lagu raraayo xirmada daawada dhaawaca hubka Soomaaliya

**Xirmada dhaawaca hubka** – waxaa lagu talagalay in dhakhaatiir iyo kalkaaliyaal caafimaad la tababaray ay ku isticmaalaan beey'ad isbitaal maadaama alaabta ku jirta xirmada inteeda badan ay u baahan yihiin aqoon caafimaad. Xirmada, oo ka kooban 79 baakad, miisaankeeduna uu yahay 1000 kg, waxay ogolaaney in si deg deg ah dhaawaca la xasilo iyo qalliin la qabto. Waxaa ku jiraa alaab lagu daaweyn karo 50 qof oo dhaawac gaaray oo ku jira isbitaal muddo hal todobaad. Hase yeeshee tiradu waxay ku xirantahay qaabka dhaawaca la maareynaayo. Sannadkii 2014, ICRC waxay isbitaalada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya gaarsisay 7 xirmo dhaawaca loogu talagalay.

**Xirmada dhayida** – Xirmadaan wey ka yar tahay Xirmada dhaawaca hubka waxaana badanaa loo isticmala si qofka dhaawacan la xasilo. Waxayna ku timaada baakad 80sm x 60sm x 60sm la ek waxaana isticmaala dhakhaatiirta, kalkaaliyaasha caafimaadka iyo dadka leh aqoonta gargaarka degdegga ah. Xirmadaan waxaa laga heli karaa isbitaalada iyo xarumaha caafimaadka. Hal xirmo oo dhayida ah wuxuu caawin karaa 20 ilaa 25 bukaan oo dhaawacyo dhexdhexaad leh.

Konton xirmooyin dhayida ah ayaa ICRC gaarsisay isbitaalada iyo xarumaha caafimaad sannadkii 2014.



Xirmada qalabka dhayida

**Xirmada gargaarka deg degga** – Tani waa boorso yar kuna jiraan waxyaalaha asaasiga u ah dhayida qofka goor dhow dhaawacmay si loo joojiyo dhiig baxa iyo si la daboolo nabarada. Waxaa lagu isticmaali karaa goobta shilka dhacdada ka dhacday ama guriga dhexdiisa. Xirmada caadiga ah ee gargaarka deg degga waxay daweyn kartaa 1-10 qof iyadoo ku xirantahay sida dhaawacoodu u daranyahay.



Waxyaalaha ay ku koobanyihiin xirmada gargaarka deg degga

Waxaana loo isticmaalaa si meel ku gaar ah illaa la helo dakhtar iyo daryeel caafimaad oo dheeraad ah.


Iyadoo la kaashaneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ICRC waxay ku tabarucday xirmooyin gargaarka deg degga ah waxayna ku caawisay tababarka gargaarka deg degga oo loo qabtay bulshooyinka ku nool daafaha Soomaaliya.

# CAAFIMAADKA TIRO AHAAN, JANAAYO - DISEMBAR 2015



## 32

Caafimaadka waa mashruuca ugug muhimsan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) Shabakadeeda baaxadda weyn guud ahaan dalka wuxuu adeegyada caafimaadka geyneysaa meel bulshooyinka u dhow. 32 xarumo caafimaad oo ay taageerto ICRC waxay gobolada Koofurta iyo Bartamaha ku yihiin ku firfircoon, todobo ka mid ah waa kuwo guur guura. Waxay bixiyaan daryeelka caafimaadkja asaasiga iyo bukaan socodka oo la siiyo daaweyn dhan cuntada nafaqada soo celisa.



## 46

Waa tirada xarumaha caafimaadka SRCS ku yaalaan waqooyi oo ay taageeraan la howlgalayaasha Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas.

## 462,002

Wadarta guud bukaan oo booqdeen xarumaha caafimaadka intii u dhaxeysay Janaayo iyo Disembar 2015.

## 15

Tirada xarumo caafimaad aan firfircooneyn colaad darteed.



## 4

ICRC waxay xaqiijineysaa in dadka qaba dhaawaca hubka ay helaan daryeelka haboon iyadoo si joogto ah u taageerto adeegyada qalliinka afar isbitaal. Isbitaalada waxay kala yihiin Keysaney iyo Madiina oo ku yaalaan Muqdisho iyo Isbitaalka Kismaayo iyo Isbitaalka Baydhabo.



## 2

Soomaaliya waa mid ka mid ah wadamada caalamka heerka nafaqo daridu ay aadka u sarreyso. ICRC waxay taageertaa labo xarumo bukaan jiif ee xannaanada deg degga ee nafaqo darida kuna yaalaan Isbitaalada Kismaayo iyo Baydhabo.Labada xarumood ee xannaanada deg degga ee nafaqo darida in kastoo keligood isku filneyn waxay bixiyaan meelo laga helo xannaanada muhimka ah ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya.

## 4,019

Xaalado dadka dhaawaca hubka qaba ayaa lagu daweeyey afarta isbitaal.

## 3,081

Wadarta guud la isu geeyey dadka la dhigay Isbitaalada Kismaayo iyo xarumaha xannaanada deg degga ee nafaqa darida Baydhabo.

Khariiradaan ujeedkeedu waa macluumaad keliya mana laha muhimad siyaasadeed.

ICRC

# MASHRUUCA: ISBITAALKA GUUD EE KISMAAYO



Isbitaalka guud ee Kismaayo waa mid ka mid ah mashaariicda caafimaadka ICRC-da Soomaaliya. Xaruntu waxay adeeg nolosha ku xiran siisaa bulshooyinka ku nool gudaha iyo daafaha magaalo xeebeedka.

Magaalada oo ku taalo meel istraatiji ah ayaa iyada ka dhigtay meel si daran looga dagaalamay marxaladihii kala duwanaa ee colaadaha Soomaaliya.

ICRC waxay dhismaha isbitaalka ku sameysay dayactir aad u weyn waxayna dhismaha ku caawintaa qalab caafimaad iyo dawooyin. Waxay kaloo shaqaalaha siisaa tababar iyo waxayna daboosha kharajka socda guud isbitaalka tusaale shidaalka matoorrada.

Daabacadan buluuga ah wuxuu ahmiyada saaraya meelaha muhimka ah ee Isbitaalka Kismaayo.


Intii u dhaxeysay bilihii Jannaayo iyo Maajo 2015, isbitaalku waxaa la dhigay 504 qof.



1

## TRIAGE-KA

Ilinka laga galo isbitaalka waa halka qiimeynta bilowga ah iyo daaweynta laga qabto. Markii dad badan yimaadaan mar qura ay wada yimaadaan waa halka bukaanada laga kala sooco si loo arko midka daaweynt ugu deg degga badan u baahanyahay.



2

## WAAXDA QALLIINTA



Qeybta qalliinka waa meel nadiif ah oo ah halka laga sameeyo hawlaha qalliinka. Waxaa ku yaala qolka laga sameeyo qalliinka, waxaana ku xiga qolka bogsashada.

Jeermis dilku aad ayuu muhim ugu yahay qolka qalliinka iyo qolal kale oo ka tirsan qeybtan waxay u go'doomeen nadiifinta iyo keydinta qalabka qalliinka.

## QEYBTA DARYEELKA DEG DEGGA AH

3

Qeybta daryeelka deg degga waa qol u go'an in lagula socdo laguna daryeelo bukaanada sida xun u xanuunsan.



Soo bandhigid la sameeyey xiili Isbitaalka Kismaayo ka socday tababar. ICRC waxay qabatay tababar ku saabsan jawaab celinta deg degga laga bixiyo isku buuqsanaanta u qabatay dhakhaatiirta iyo kalkaaliyaasha caafimaad caafimaadka ee isbitaalka si loogu tababaro waxqabadka ugu wanaagsan ee triage-ka.

Waa muhim in bukaanka KELIYA iyo HAL qof oo caawiye ah ay yimaadaan isbitaalka. Dad badan oo meesha yimaada waxay carqaladeynayaan kalkaaliyaasha caafimaad iyo dhakhaatiirta oo isku dayeyaan in ay daweyaan kuwa xanuunsan. Qofka caawiyaha ah ayaa u yeeri karaa qoyska iyo asxaabta si ugu sheego horumarka.



Mashiinka raajada Kismaayo

6

## X-RAY

Isbitaalka wuxuu leeyahay qolka raajada oo ku jira hal mashiin oo raajo oo ah qeyb qalab muhim ah oo lagu baarayo qaabka iyo xadiga dhaawaca bukaanka ku yaalo.





5

## SHEYBAARKA

Sheybaarku waa halka tijaabooyinka caafimaad iyo shaqada dhiigga sida caadiga lagu sameeyo si loo helo xog ku saabsan caafimaadka bukaanka si loo doorto daweynta.




Isbitaalku wuxuu keydiyaa diiwaanka tabarruca dhiigga oo laga heli karo sheybaarka

Qolka daweynta jirka wuxuu bukaanka ku caawinaaya in dib u helaan dhaqdhaqaaqa jirka

4

## QOLALKA

Isbitaalka Kismaayo wuxuu leeyahay qolal loogu tala galay rag iyo dumar oo bukaanada la seexiyo laguna daryeelo. Hadda waxaa jira qol awoodiisu tahay 40 bukaan waxaa la wadaa qorshe awooda la gaarsiinaayo 60 mar haddii qolka raga oo gaboobay la dayactiro.





"Iyadoo isbedelada qaab-dhismeedka Isbitaalka Kismaayo uu muuqdo, hadafkeena ugu muhimsan waa daryeelka loo fidiyo bukaannada. Waxaan isku dayeynaa in aad hagaajino hababka iyadoo la tababaraayo shaqaalaha waaxaha kala duwan ee isbitaalka."

- Gail Corbett,
Maamulaha Barnaamijka Isbitaalka ee ICRC

# KA HIRGELINTA DARYEELKA CAAFIMAADKA MEELO LA GAARI KARO

Malaayiin qofood oo ku dhaqan dunida oo idil ayaa heli karin xarumo caafimaad oo tayo leh kuna yaalaan meelo aan ka fogeyn taasina waa mid ka mid ah caqabadaha bani'aadamnimo ee maanta. Tani waxay gaar ahaan si dhab ah ugu jirtaa Soomaaliya oo ay la kulantay kaabayaasheeda caafimaad oo sii xumaanayo intii lagu gudajiray tobaneeyo sano oo dagaal socday.

Sanadadihii dagaalada sokeeyo waxay si weyn u burburiyeen nidaamkii daryeelka caafimaadka dadweynaha waxayna cayriyeen shaqaalo taqasus leh. Inkastoo ay mas'uuliyiinta goboleed, hay'adaha samafalka, hay'adaha gaarka, iyo adeegayaal caafimaad caadiga ah yareeyeen baahidaan, weli waxaa jira waxbadan oo ah in la qabto. Intaa waxaa dheer, jidad iyo gadiid hore iyo gadaal lagu tagi karo goobaha caafimaadka ayaa carqalad helis daryeel caafimaad u ah dadka degan meelaha qaarkood.

Goobta Dangoroyo ayaa u shaqeysa tusaale ahaan. Waxay ku taala 100 km waqooyiga Garoowe ee Gobolka Nugaal ee geeska waddanka. Dangoroyo waxay hoy u tahay ku dhowaad 16 tuulo oo ku firirsan dhulka ballaaran ee miyiga. Dadka deeganka intooda badan waa xoolo dhaqato oo nolol dhexdhexaad ah ka hela iibinta xoolahooda.

Haddi qof ka tirsan mid ka mid tuulooyinka uu u baahdo daryeel caafimaad marka ugu horreysa waa in uu lugeeyo xarunta Dongoroyo ka dibna in uu u safro Garoowe isagoo/ iyadoo isticmaalaya/isticmaaleysa



**Muuqaal dusha sareee goob fog Dangoroya ah ee Koonfurta Soomaaliya**

gaadiidka dadweynaha. Kharashka wuxuu noqon karaa qaali, doorashada gaadiidka dadweynaha ma ahan mid had iyo jeer lagu kalsoonaan karo ayaa dadka deegaanka ku khasbeysaa in lacag la'aan ku raacaan gaadiidka ganacsiga oo ku safra waddaada Boosaaso iyo Garoowe.

Iyadoo ay jirto inaan la wada dabooli karin xarumaha caafimaadka ee tuulooyinka fog, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa aasaastay rug caafimaad oo yar si ugu adeegto deegaanka. Markii hore xaruntu waxay bixin jirtay adeegyada Hooyada iyo Dhallaanka laakiinse tan iyo waqtigaas ayey ballaarisay baaxadeeda hadana adeeg u fidineysa baahiyaha caafimaad oo ballaaran ee kala duwan.



**Sarkaal xarunta Dangorayo oo hooyooyin siinaya cashar ku saabsan hababka caafimaadka leh ee naasnuujinata**

"Waxaan ogaanay dalabaadka nooga imaaneyaan dadka deegaanka kuwaas oo si joogto ah halkaan u soo booqda mana diidi karno in aan wax u qabano. Qof buka waqti loogu sheekeeyo in isbitaalka loogu tala galay hooyada keliya ma jirto--- wuxuu u baahanyahay caawimo,"Dr. Cabdullaahi Xassan oo xarunta maamula ayaa sidaa yiri..

Iyadoo xaruntu dadka ku nool deegaanka ay siiso adeeg muhim ah, xaaladaha qaar ma sahla waana in loo gudbiyo Garoowe si ay u helaan daryeel dheeraad oo heer sare ah. Ambalaas oo aan jirin ayaa dhibka sii xumeeyey kuna khasbay dadka deegaanka xanuunsan in ay raadsadaan gaadiidkooda.

Sida uu sheegay Dr. Axmed Maxamed Xassan, Madaxweynaha hawl-gabka galay ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) (1984 - 2015) wuxuu qabtay shaqo badan oo weli u baahan in la sii qabto si loo bixiyo adeegyo daryeelka caafimaadka oo ku filan gudaha Soomaaliya. Joogitaanka baaxada weyn ee ururku joogo dalka is u dhowaansha ay la leeyihiin bulshooyinka ayaa muhim u ah in daryeelka caafimaadka la geeyo meel la gaari karo.

Waxaa jira 72 xarumood oo ay maamusho Ururka Bisha Cas Soomaaliya oo dhan, kuwaasoo 18 ka mid ah ay yihiin kuwa guurguura, oo bixiya adeegyo hooyo iyo dhallaan iyo weliba bukaan socotada. Inkastoo wax badan ay tahay in la qabto, goobahan caafimaad waxay kordhiyeen helista daryeel caafimaad oo aasaasi ah.

"Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay Soomaaliya oo dhan ka bixiyaan door adeeg oo muhiim ah. Maanta hooyo xaamilo ah oo ku nool meel fog waxay awoodi kartaa in ay booqato xarun caafimaad ku taalo meel aan ka fogeyn halka ay ku nooshahay,"sidaa waxaa yiri Xassan, oo si fiican ugu warqaba xaaladda wanaagsanaatay ee dhacdan ay siisay cunnuga.

# KALKAALIYE CAAFIMAAD KU JIRA TABABAR QALLIIN: JIIL CUSUB OO NOLOL KU BADBAADINAAYA SOOMAALIYA



**Dr. Taajir, dhakhtarka sare ee qalliinka Isbitaalka Keysaney wuxuu isbitaalka ku tababaraya kalkaaliyaal caafimaad. Yaxye (fadhiya dhexda safka hore) wuxuu qaatay tababar kalkaaliye caafimaad dhanka qalliinka. Hadda wuxuu awood u leeyahay in dhakhaatiirta qalliinka ku caawiyo wax ka qabashada xaaladaha khaaska ah.**

Maalintii ugu horraysay ee Kalkaaliye Yaxya iska xaadiriyey waaxda qalliinka Isbitaalka Keysaney oo ku yaalo Muqdisho ayaa waxaa la keenay bukaan qaba dhawacyo xabad oo halis ah. Yaxye ayaa cawiyay dhakhaatiirta sare qalliinka si ay ka samata bixiyaan khatarta, fursaddaan caawinta ahna loogu magac daray "riyo rumowday."

"Tani waxay gebi ahaanba i dareensiisay farxad weyn," Yaxye ayaaa sidaa yiri maalintiisi ugu horreysay ee qalliin sameeyay bishii Abriil. Isagoo ku koray caasimadda Soomaaliya oo aragtay dagaalo burbur leh iyo weeraro bambaano, Yahye wuxuu bilaabay inuu daneeyo kaalmeynta dhibanayaasha qalaalasaha.

"Ka arday ahaan, ma sugi karin inaan dhameysto waxbarashadeydi,"sidaa waxaa yiri 21 jir.

Iyadoo ay yaraadeen dagaalda xooggan, waxaa marmar dhaca shilal argagaxiso. Isbitaalka Keysaney wuxuu door weyn ka ciyaaray inuu daryeel caafimaad deg deg ah siiyo dadka ay saameeyeen caqabada guud ee dhaqaale dagaal. Yahye wuxuu u riyaaqayaa in isbitaalka uu fursad siiyo kalkaaliyaasha ku hamminaya inay wax bartaan ayna ka qeyb qaataan.

"Waxaan jeclaan lahaa in aan arko arday fara badan oo baranaya caafimmadka in ay ka qeyb qaataan tababarkaan sharafta leh si ay hagaajiyaan nolosha bulshada guud. Waxaan rumeysanahay in aan keeni karno isbedel," Yaxye oo dhammeysanaya tababarka horaanta 2016 ayaa yiri sidaas.

Yaxye wuxuu qaatay tababar kalkaaliye caafimaad ee dhanka qalliinka, dhayida iyo tolida. Asagoo raacaya talada dhakhtarka sare ee qalliinka isbitaalka, Dr. Axmed Maxamed- sida weyn loo yaqaano Dr. Taajir ayaa Yaxye hadda awood u leeyahay in dhakhaatiirta qalliinka ku caawiyo la wax ka qabashada xaaladaha khaaska ah.

Keysaney waa mid ka mid ah isbitaalada Soomaaliya ugu sareeya. Intii u dhexeysay Janaayo iyo Maay 2015, in ka badan 700 bukaan ayaa la dhigay isbitaalka oo 217 ay ahaayeen xaalado la xiriira dhaawac hub. ICRC waxay taageertaa afar isbitaal oo ku yaalaan Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya oona ka mid ah Isbitaalka Keysaney oo si buuxda loo qalabeeyey si lo daaweeyo xaaladaha dhaawaca hubka.



**Yaxye Cabdi, Kalkaaliye caafimaad ku jira tababar oo qoranaaya xusuusyo intii lagu gudaha jiray tababarka Isbitaalka Keysaney, Muqdisho.**



**Dr.Taajir oo baaraya raajo bukaan Yaxyena uu eegaayo. Isbitaalka Keysaney door muhim ah ayuu ka cayaaray in gagaar caafimaad oo deg deg ah u fidiyo dadka waxyeelada ka soo gaartay dagaalada.**

# KU CAAWINAAYA HOOYADA HAGAAJINTA NAFAQADA CANUGGA, SOOMAALIYA

Soomaaliya waxaa burburiyey tobanaan sano oo colaad hubeysan ayna carqaladeeyeen dhismaha habnololeedka bulshada kuna riday jahawareer. Abaaraha dhacaya xilliyada iyo fatahaadaha ayaa dhibaatada sii xoojiyey ayagoo qeybo ka mid ah waddanka ka abuuray cunto yari ba'an. Caruurta, gaar ahaan kuwa da'dooda ka yartahay shan sano ayaa u nugul cudurrada ka dhasha cunto yarida oo aan la hubinin oo nafaqo-darada ka dhalaneysa in ay tahay dilaa.




Dhisme ku yaal Soomaaliya oo ku burburay sanooyin colaad jirtay

*Maryan waa 23 jir waxay canugeeda oo 9 bilood jira keentay Isbitaal Goboleedka Baydhabo. Canugga wuxuu u muuqdaa mid daciif ah oo hurdo haysta oona gacmaheeda ay ku hayso.

"Muddo dheer ayuu xanuunsanaa. Waxaan tagey tiro xarumo caafimaad midna uma muuqan in uu shaqeynaayo. Waxaa la i dhigay halkaan ee Isbitaalka, waan u duceyna in ay bogsato."

Isbitaal Goboleedka Baydhabo Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqo-darida ayaa Maryan canuggeed waxaa laga siin doonaa quudin dheeri ah lagana daweeyn doonaa cudurro la xiriira nafaqo-darida. Wuxuu barnaamijka quudinta ku joogi doonaa illaa uu gaaro culeyska ugu habboon.

ICRC waxay go'aansatay in ay taageerto Isbitaalka Kismaayo qeybta bukaan jiifka lagu nafaqeeyo (Stabilization Centre), go'aankaasina waxay gartay markii Medicines Sans Frontiers (MSF) si deg deg ah kaga baxeen Soomaaliya Agoosto 2013. Maay 2015 waxay barnaamij kaa la mid ah ka bilowday Isbitaal Goboleedka Baydhabo.

Nafaqo-darada waa dhibaato baahday oo haysata caruurta ku nool Soomaaliya. Badanaa waxaa sababa cunto la'aan iyo fikrado khaldan oo laga aaminsanyahay habka quudinta.

Maryan waa ay joojisay naas nuujinta canuggeed mana rabto in mar kale ay nuujiso. Waxaa suurtagal ah in ay uur leedahay, waxayna ka cabsataa in canugga uurka ku jira wax gaari karo.

"Waxaa jiraa aqoon la'aan dhanka baahiyada nafaqada caruurta. Waa muhiim in barnaamijka uu la shaqeeyo hooyooyinka iyo xanaano bixiyeyaasha si ay dadka ugu dhaadhiciyaan hababka quudinta habboon," waxaa sidaa tiri Kristy Manners, ergo ka tirsan ICRC u qaabilsan barnaamijka nafaqeynta.

Xarunta, Maryan waxaa lagula taliya caadooyinka quudinta habboon iyo



Maryan iyo canugeed oo joogaan Isbitaalka Baydhabo ee Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqo darida caruurta



Maryan canugeeda sagaal bilood jirka ah



**Waa waqtiga qadada jikada Xarunta Xanaanada Baydhabo waxay ku mashquulsantahay cunta siinta hooyada iyo xanaano bixiyeyaasha.**

muhiimada caafimaadka canugga uu u leeyahay caanaha naaska. Arrinteeda waxay muhiimad gaar ah siinaysaa baahida loo qabo barnaamijka bukaan jiifka halkaas oo hooyada si joogto ah ula xiriireyso shaqaalaha nafaqeynta intii canuggeeda soo kabsanayo.

Isbitaalka Baydhabo qeybta Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqodarida waxay hooyada siisaa cunto saddex jeer maalintii iyo xanaano bixiyeyaal ilaa iyo mudada soo kabsashada canugga.

Tirada bukaan oo soo booqanaaya xarunta waa ay saddex jibaarantay tan iyo intii si buuxda u hawl gashay. Tani waxaa sabab u ah habka guud ee barnaamijka u taageero canugga iyo hooyada ama xanaano bixiyaha.

Sida laga soo xigtay ururada caalamiga ah, ku dhowaad 300,000 caruur ku sugan Soomaaliya ayaa nafaqo xumo haysa, ku dhowaad 58,000 kuwaas ka mid ahna ayaa si ba'an nafaqo xumi u haysaa waxayna si daran ugu baahanyihiin quudin ku daweyn iyo daaweynta caafimaadka. Labada xarumood la xusay, inkastoo keligood isku filneyn waxay yihiin meel laga helo xanaanadaan muhimka ah ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya.



**Kalkaaliso caafimaad oo baareysa mid ka mid ah caruurta la dhigay Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqo darida caruurta ee Isbitaal Goboleedka Baydhabo.**

# MUHIMADDA AY LEEDAHAY BOOQASHADA XARUNTA CAAFIMAADKA EE SRCS

La taliyeyaasha caafimaadka ICRC waxay hooyada iyo caruurtooda kula talinaayaan in ay booqdaan xarumaha caafimaadka ee Hooyada iyo Dhallaanka marka ay uur leeyihiin iyo ka dib marka ay dhalaan. Tani waxay yareysneysaa dhibaatooyinka dhaca mudada uurka iyo dhalmada. Xarumaha caafimaadka waxay kaloo bixiyaan talo oo xaqiijineysa wanaagga hooyada iyo ilmaheeda.

### 3 tallaabo oo fudud oo ay tahay hooyada in ay raacdo




1 Booqo xarunta caafimaadka inta aad uurka leedahay



2 Dhalmada ka dib ugu yaraan 6 bilood naaska keliya nuuji



3 Si joogto ah u booqo xarunta caafimaadka dhalmada ka dib




Instagram
@icrc_somalia

ICRC

Ergada ICRCda Soomaaliya
Wadada Denis Pritt
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyada Mogadishu, Kismaayo, Garoowe, Baydhabo iyo Xudur ee Soomaaliya

www.icrc.org
© ICRC, Febraayo 2016

Sawiraddo dhan: Pedram Yazdi/ICRC iyo Mohamud Miraj/ ICRC

**WAAJIBAADKEEDA SHAQO**

Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Cas (ICRC) waa hay'ad eexasho la'aan, dhexdhexaad oo madax bannaan ah, waajibaadkeedana keliya waa in ay dhowrto nolosha iyo sharafta dhibbanayaasha colaadaha hubaysan iyo xaalado kale ee qalalaase ah iyo inay siiso gargaar biniaadminimo leh. ICRCdu waxay kaloo ku dadaashaa inay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarinayso islamarkaana xoojinaysa xeerka aadminimada iyo mabaadi'ida caalamiga ah ee aadminimada.

2016 0033/402 04.2016 3000